# SOOYAALKII NOLOLEED IYO HALGAMEED

# EE

# MUDANE CABDIRAXMAAN CABDILAAHI FAARAX "GURI BARWAAQO"

Bahda Mareegta Farshaxan

May, 2023

(Qaybtii Koowaad)


*"LaaxinJire waa qorme kumbuyuutar oo ku dhisaalan aragtida Miisaanka Maansada looguna talagalay inuu saxo ama kugu baraarujiyo laaxinka iyo deelqaafka gala badaha kala duwan ee maansada Soomaaliyeed."*

*Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi"Guri Barwaaqo"*

Waa arooryo hore oo ay maalintu ku beegan tahay Isniin.Bishuna ay ku beegan tahay Abril 3dii ee isla gu'gan 2023.Waa maalin shaqo oo waxaa laga soo baxey laba cisho oo fasax lagu jirey aheydna dhamaadkii toddobaadka (Weekend).Waxaan ku hubsadey caruurtii inaan kala geeyo dugsiyadii ay kala dhiganayeen,kuna soo noqdey guriga si aan ugu diyaargaroobo fasalka ugu horeeya maalintaa oo aan galayey 10ka aroornimo.Xilli ay goorsheegtu ku beegan tahay ilaa 9:23 aroornimo ayaan maqley codka sheega in fariini ku soo dhacdey koorta (mobile - cellphone). Waan eegay mise waa Sayid Axmed (Dhegay) , oonu hawlo dhawr ah ka wada sheekaysaneynay, si dhakhso ah ayaan u furey una dhageysatay.

Codka duuban oo ahaa 1 daqiiqo iyo 23 ilbidhiqsi waan wada dhageysan kari waayey, warka dhiiladuna wuxuu iigu dhamaa 15ka ilbidhiqsi ee ugu horeeya. Waxay igu noqotey qaadan waa, waxaanan la hadley dhawr qof oo Hargeysa joogay ilaa ay inantaan adeerka u ahey ee Layla Maxamed Sh. ay ka soo hubisay marxuumka walaashii oo ay jaar ahaayeen.Inkastoon dhawr jeer isku dayey inaan garaaco telefoonka qoyska, kumaan guuleysan.

Markaa waxaan u hawlgalay inaan naftan filanwaagu ku dhacey u caqli celiyo, waxbadan oo ku soo boodo ku noqdeyna aan uga hogotusaaleeyo.Waxaan nafta la waddaagey in noole dhamaantii dhimanayo, aanan ku dul akhriyey aayada Suuratu Alraxmaan ( ):




Naftii jahawareersaneyd, wax weyni ku dul habsadey ayaa Illaahay aayadaa uga dhigay inay ku hesho deganaansho, aaney bilawdey inay u hawlgasho waxa dhacdadan kala gudboon aaney ugu horeyso u ducayn Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax “ina Guri Barwaaqo”,  iyo gudbinta tacsidii  intii u dhaweyd ee ehel, tol , saaxiibo, iwm.

Waxaa markan maankeyga ku soo dhacey oo nafta sii dejiyey markaan ogaa inuu Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye “Guri Barwaaqo” had iyo jeer ku hawlanaa waxtarka bulshada uu la noolaa, geeriduna soo haleeshay isagoo soo bandhigay waxtarkii ugu mug weynaa ee abid loo sameeyey  suugaanta Afka Soomaaliga oo ah  qormada Laaxinjire ( Laaxinjire application). Ka dibana waxaan xasuustey xadiiskii Nabiga (SCW)  ee ahaa:



## SOOYAALKII NOLOLEED IYO AQOONEED:

Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax (Guri Barwaaqo) wuxuu ka soo jeedaa qoys sooyaal mudnaan iyo maamuus ku dhex leh bulshada Soomaaliyeed ee kala degan shanta dal, gaar ahaan ummada reer Soomaaliland. Aabihii waa Cabdilaahi Faarax Diiriye, hooyadiina waa Shukri Aw Cilmi Food oo aheyd guri joog sida ay u badan yihiin hooyoyinka Soomaaliyeed. Cabdilaahi Faarax Diiriye wuxuu ka shaqeyn jirey wakaaladii Bosta iyo Isgaadhsiinta ee dalka Soomaaliland uu hoos iman jirey maamulkii dawladii Ingiriis sida isarabsi ah (British Somaliland Protectorate).

Cabdilaahi Faarax Diiriye wuxuu waxbarasahda dadka waaweyn ka galay dugsigii Camuud gu'gii 1954kii. Ardeydii ay dugsiga dadka waaweyn wada galeen waxaa ka mid ahaa Axmed Jaambiir Kaahin oo arintaaa uga waramey marxuum Cabdiraxmaan mar ay ku kulmeen faras magaalada Hargeysa, siiba bar kulanka qaxwaha ee Cajab.


Cabdilaahi Faarax markii uu waxbarashadaa soo dhameystay waxaa loo badaley magaalada Berbera, waana halka uu inankiisa curad kula baxey naaneystii "Berberaawi" ee aan u hanoqaadin, kana soo gudbin dugsiga dhexe ee Biyo-Dhacey. Cabdilaahi Faarax Diiriye muddo gaaban markuu ka shaqeeyey magaalada Berbera ayuu helay in loo diro tababar aqooneed magaalada Cadan ee dalkii Yementa Koonfureed. Markii uu Cabdilaahi Faarax Diiriye ka soo noqdey ayuu shaqadii ka sii wadey isla wakaaladii Boosta iyo Isgaadhsiinta ee magaalada

Hargeysa,kuna hawlgalay Farsamo Yaqaan isgaadhsiineed Communication Technician).



Xaruntii hore ee Boosta iyo isgaadhsiinta Berbera ee uu Cabdillaahi Faarax Diiriye 'Guri Barwaaqo' ka shaqayn jirey.(2012kii buu sawirkan Cabdiraxmaan Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo' qaaday mar uu socdaal ku tegey magaalada Berbera)






MudaneAxmed Jaambiir Kaahin.(bidix) iyo AHUN-tee jaalahii

Cabdillaahi Faarax Diiriye 'Guri Barwaaqo' -----

Xuquuqda sawirada Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi.

Magac Guri-Barwaaqo waxay aheyd naaneysta mudane Cabdilaahi Faarax Diiriye oo u lahaa halheys uu carabkiisa la qabsadey. Sababha ay dadku ku helaan naaneysaha ayaa mid ka mid ahí ay tahay in halhelyska qof looga dhigo naaneys waarta oo la jaanqaada.

Labada waalid ee Cabdilaahi Faarax Diiriye iyo Shukri Aw Cilmi Food ayu Illaahay ku galadey siddeed caruur ah oo kala ah 6 wiil iyo 2 gadhood, waxay kala yihiin:

1- Maxamed Cabdilaahi Faarax "Guri Barwaaqi"- (Maxamed Fani)
2- Cabdiraxmaan Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'
3- Dr. Saleebaan Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'
4- Aadan Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'
5- Xasan cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'
6- Axmed Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'
7- Milgo Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'
8- Ismahaan Cabdillaahi Faarax 'Guri Barwaaqo'

Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye "Guri Barwaaqo" wuxuu ku dhashay magaalada Hargeysa, hilaadii 1951, bishii Janaayo 1dii. Wuxuu Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye "Guri Barwaaqo" ku barbaarey, kuna hanoqaadey isla magaalada Hargeysa. Malcaamada wuxuu Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye "Guri Barwaaqo" ka bilaabey malcaamadii Macalin Aw Xuseen Warsame ee ku taalay woqooyiga xaafada Laba Nuux. Malcaamadaa wuxuu marxuumku bilaabey gu'gii 1958kii. Ardeyda ay malcaamadaa wada galeen waxaa ka mid ahaa Mujaahid Axmed Muxumed Madar oo ay xidid iyo tolba ahaayeen.

Waxbarashada dugsiga hoose wuxuu Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye "Guri Barwaaqo" ka bilaabey dugsigii Riis gu' dugsiyeedkii 1961-1962, waxaanu dhameeyey gu' dugsiyeedkii 1963-1964kii.

Waxbarashada dugsiga dhexe wuxuu Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye "Guri Barwaaqo" ka bilaabey dugsigii Biyo-Dhacey ee iminka la yidhaa Sh. Cali Xaaji Ibraahin gu' dugsiyeedkii 1964-1965, waxaanu dhameeyey gu' dugsiyeedkii 1967-1968kii. Ardeydii ay dugisgaa wada dhigan jireen waxaa ka mid ah Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taani, Yuusuf Cabdilaahi Kaahin "Yuusuf Geydg", Siciid Shukri, Siciid Maygaag Samater, Korneyl Ibraahin Koodbuur,Korneyl Yaasiin Ismaaciil Maygaag,Korneyl Qamariye, Axmed Xasan Aaadan "Weyse Cade", Axmed Muxumed Madar, iwm.

Dugsiga Faarax Oomaar oo markaa la odhan jirey Xabadi Keentay ayaan dhismihii weli dhamaan, sidaa darteed ayaa Marxuum Cabdiraxmaan Cabdilaahi Faarax Diiriye "Guri Barwaaqo" ku si bilaabey waxbarashadiisii dugsiga sare si ku meel gaadh ahaana dugsigii Sykes Thmposon oo iminka ah dugsiga dhexe ee Axmed Gurey. Waxaanu marxuumku bilaabey

waxbarashadaaa gu'dugsiyeedkii  1968-1969, waxaanu dhameeyey gu' dugsiyeedkii 1971-1972kii.

Xilligan waxaa la joojiyey ardeydii loo diri jirey dalka Ingiriisiga ee la siin jirey  waxbarasho dibadeed (Scholarship).  Ardeydii ugu danbeysana waxay ahaaayeen ardeydii gu' dugsiyeedkii 1970-1971kii. Waxaana loo direy dalka Ingiriiska dabayaaqadii isla  gu'gaa 1971kii. Ardeydaa waxaa ka mid ahaa:  Axmed Xaaji Cabdilaahi(Suufi),Maxamed Maxamuud (kitaable),Ibraahim Maxamed Sh.Muuse,Cabdiwahaab Sayid Cismaan,Cali Aadan Maxamed,Maxamed Cumar Cabdala,Sh.Cismaan Maxamuud,Ibraahin Cali Saleebaan,Maxamed X. Askar Cabdilaahi, Axmed Cadaani Yuusuf iyo Siciid Sh.Cumar.

Qalinkii iyo Tifatirkii:

Fu'aad Sh. Jabha

Badha Mareegaha Farshaxan

Bahda Xarunta Aqoon Baadhista ee Farshaxan

Tixraac:

- Wareysi Marxuum Cabriaxmaan Faarax Barwaaqo
- Wareysi  Mujaahid Axmed Muxumed Madar.
- Wareysi uu Marxuumku la yeeshay Axmed Jaambiir Kaahin
- Wareysi Mujaahid Maxmed Baaruud
- Sooyaalkii Eng. Maxamed Fani  Cadilaahi – Qalinkii Craxmaan Guri Barwaaqo
- Kaydka Mareegaha Farshaxan